

# Taleefoonka Wada Hadalka Dadka la Aftuubtay

## Abduubtay

Seattle Police Department (SPD)

### Waa maxay Tignoolojiyda?

Kiishada adag ee taleefoonka wada hadalka dadka la afduubtay waa kiis adag oo qayb ka ah nidaamka xariirada loo adeegsado wada hadallada dadka la afduubto/masiibada ee booliisku la sameeyaan dadka la afduubtay. Kiishada taleefanka waxaa ku jira mikrafoonno iyo sameecado si loo fududeeyo wada hadalka labada dhinac qaab war isa siin ah ama wada sheekaysi ah. Waxaa ku jira kaamirooyin qarsoon si ay u taageeraan qiimaynta khatarta iyo taagtikada.



### Maxaan u isticmaaleynaa tignoolojiyada?

Ugu yaraan ma jiraan qaabab kale oo xariirka taleefanka lagula samayn karo dadka afduuban ama qofka xaalada xanibaada ah ku jira nidaamkaan ayaana saflaaya in xariir ammaan ah oo sugan lala sameeyo qofka asagoo laga fog yahay. Nidaamku wuxuu u sahlayaa kooxda inay kormeeraan ayna duubaan wada sheekaysiyada si loo fududeeyo abuurista xeeladaha wada hadalka loona xaqiijiyo in xogta la xariirta badqabka la cuskado. Nidaamka taleefanka la tuuro ee qaabkaan ah ayaa ah qalab loo sameeyay Hostage/Crisis Negotiation Teams (Kooxaha Wada Hadalka Afduubka/Masiibada) si waafaqsan National Council of Negotiation Associations (Heerarka Ururada Guddiga Qaran ee Wada Hadalka), FBI Crisis Negotiation Unit (Waaxda Wada Hadalka ee FBI), National Tactical Officers' Association (Ururka Qaran ee Taagtikada Ciidanka), iyo laamaha kale.

Waqtiga ay furanyihiin fikradaha dadwaynaha ee ku aadan qalabkaan ayaa hada socda. Waxaad faallooyin ku bixin kartaa [Seattle.gov/SurveillanceComment](https://www.seattle.gov/SurveillanceComment).

Faallooyinka dhamaan waxaa lagu dari doonaa Surveillance Impact Report (Warbixinta Saameynta Dabagalka) ee farsamadan waxaana loo gudbinayaa Gollaha.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso war celin xili ka baxsan xiliga u furan faallooyinka, fadlan si toos ugu dir Golaha Magaalada.

### Uruurinta

Muuqaalka tooska ah ayay kor kala soconaysaa HNT ama ciidanka Special Weapons And Tactics (SWAT, Taatikada iyo Hubka Khaaska ah) ayagoo jooga midkood tagaada HNT, nidaam ku xiran laabtoob, ama aalad lagala socdo rimuudka oo taala meel wifi gu gaaro. Shaqaale qaas ah ayaa si xadidan u geli kara ayagoo adeegsanaaya baasaweer ama ogolaansho ay ka qaadanayaan nidaamka guud ee hagaaya laabtoobka. Muuqaalka lagu duubo nidaamka hard drive ka waxaa keliya arki kara shaqaalaha HNT ayagoo adeegsanaaya DVR.

### Isticmaalka

Adeegsiga nidaamka taleefoonka la duuro loo adeegsado dhacdo ayaa u baahan ogolaanshaha kormeeraha HNT, amaanduulaha shaqada, iyo amaanduulaha SWAT hadduu joogo. Adeegsiga taleefanka la tuuro ayaa badanaa horey loogala hadlaa cida dhibaataada ku jirta ayadoo la adeegsanaayo tuuris ama qaabab kale. Si qalabka taleefanka wada hadalka loogu tuuro dhibanaha waxaa caadiyan lagasoo geliyaa albaabka waxaana gasha xubnaha ciidanka SWAT qofkana waxaa laga codsadaa inuu gudaha soo gasho. Sababo dhanka amaanka ah awgood taleefoonka ayaa laga tuuraa daaqad ama albaab furan.

### Difaacyada

Ku ridista qalabka aag sharcigu difaacaayo ayaa u baahan ogolaanshaha gelitaanka meesha ayadoo loo baahan yahay waaranti ama shardi dhaafka waarantiga oo ay ku jirto ogolaansho, marka ay jiraan xaalado gaar ah, ama daryeelka/xaalada degdega ah ee bulshada. Revised Code of Washington (RCW, Xeerka Dib loo eegay ee Washington) 9.73.030 ayaa si cad u bixinaaya shardi dhaaf ku aadan ogolaanshaha "dhammaan dhinacyada" ee la socoshada, qabashada xogta, iyo duubista wicitaannada la xariira xariirada lala sameeyo af-duubtaha ama qofka la afduubtay.